Siciid Jaamac Xuseen“Faras”- Haldoor Ku Dayasho Mudan

Abril 22, 2020

Odhaahda Tifaftirka- WDN: *Waxa sharaf iyo qaddarin noo ah in aanu qormadan ku maamuusno Macallin, Haldoor, Qoraa iyo Hal-abuur aad ugu weyn guud ahaan ummadda Soomaaliyeed- waa Ustaad Siciid Jaamac Xuseen. Sidaa darteed waxa aanu idinla wadaageynaa qoraallo kooban oo dad badan oo mug ku leh Soomaali, oo ay Siciid wadashaqeyn iyo isbarasho dhexmartay, ay aragtidooda iyo mahadhooyinka ay kala kulmeen Siciid ku soo gudbin doonaan. Waxaan rajaynaynaa inaad wax badan ka dhugan doontaan aragtida kala duwan ee qorayaasha maqaalkan – Haldoor Ku dayasho mudan.*

Siciid Jaamac – Erayo kooban

W/Q Dr. Maxamed Daahir Afrax

Aan kuu ilmeeyee
Horta dhimo af maahee
Ifkaan kaaga baahnahay
Wax yaroo aqoonsi ah. Abwaan **Gaarriye**, Alle Naxariistii Janno ha ka waraabiye.

Meerisyadan aan ka soo amaahday afarreey jiifto ah oo uu – geeridiisii ka hor – ku kaftan-dhableeyey Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac Gaarriye (AUN) waxaa maanta i xusuusiyey Bahda Wardheernews tallaabo nooceedu dhif nagu yahay oo ay dhawaan isu xil-saareen. Laga soo billaabo 2017-kii wuxuu damiirkoodu ku dhaqaajiyey inay dadka ku baraarujiyaan qiimaha iyo waxtarka haldoorka bulshada, inta ay wali ifka joogaan, halka la caadeystey in keliya wanaaggooda la tilmaamo waqti aan ammaani waxba u tarayn (geeridooda ka dib) sidii uu ka afeeftay Abwaan Gaarriye.



Waxay ku billaabeen Dr Georgi Kapchits oo ah khabiir Ruush ah oo AfSoomaaliga qoran iyo suugaantiisa ku soo biiriyey dhaxal aad u qaali ah.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Imminkana waxay ila socodsiiyeen in ay sidii si la mid ah akhristeyaashooda ugu baraarujin doonaan qofka uu yahay iyo qiimaha uu ummadda ugu fadhiyo Siciid Jaamac Xuseen. Waxay i weyddiiyeen inaan erayo kooban Siciid uga tilmaan-bixiyo, wallow ay isu kay qaban la'dahay "Siciid Jaamac wax ka dheh" iyo "erayada soo koob!"

Qalinka ayaan ka baqayaa in uu xarga-goosto marka Siciid Jaamac la xusuusiyo. Haddaba waa afeefe, qalinku hadduu taraaraxo uga garaaba sababtu inay tahay nooca qofka uu yahay ina Jaamac Faras iyo qotadheerida aqoonta uu u leeyahay Ina Daahir Afrax!

Siciid Jaamac Xuseen "Siciid Gucmudi" shaki kuma jiro in uu yahay haldoor kudayasho mudan. Igama aha waa saaxiibkaaye ammaan ugu eexo, balse waxay iga tahay "runta Ilaah baa kugu jecel". Eex igama ahee waa oraah ka soo maaxatey aqoon dheer iyo u fiirsi badan. Muddo nus-qarni gaareysa ayuu Siciid Jaamac ii ahaa waxa Af Carabiga lagu tilmaamo الدرب رافيق (jaalkayga jidka dheer). Jid dheer oo qodax iyo qaniinyo badan ayaan isla soo jibaaxnay, ka soo bilow Muqdisho iyo toddobaatannadii qarnigii labaatanaad; Addis Ababa iyo horraantii siddeetannada; Cadan iyo nuskii dambee isla siddeetannada; London iyo sagaashannadii; ka dib iyo goobo teelteel ah oo ay ka mid ahaayeen Jabuuti iyo Hargeysa; markaan kala fognahayna kala war-helid joogta ah ayaan juhdi-wadaag ku ahayn. Juhdigaas aan isku biirsaneyney iyo jidkaas qodxaha badan ee aan isla soo jibaaxayney wuxuu naga ahaa raacdayn hiigsi sama-doonnimo – Waxay nala ahayd, ama aan is moodsiineyney inaan nahay *sahanka samaha guud* (common wellbeing).

Murtida Soomaalida waxaa ka mid ah "qofka ma baran kartid ilaa aad jid la marto ama jabad la degto ama jidiin la cunto". Sciid Jaamac intaba waan isla soo marnay, waana halka uu ka soo maaxdey marag-furkii an ku tilaamayey 'haldoor kudayasho mudan"; sama-talis saxar-diid ah; indheer-garad aqoon-dhaari ah; ikhyaar akhlaaq suubban lagu mannaystay; aftahan aan laga daba hadlin, lagana daalin kaftankiisa murtiyeysan. Waxa aan ku 'tilmaamayo kaftanka murtiyeysan' waa mid ka mid ah hibooyinka Siciid Jaamac lagu mannaystay. Dadka badankoodu marka ay hadlayaan ama wax qorayaan laba ayay u kala baxaan. Qof maadeeya uun oo hadalkiisa lagu qoslo (jaajaale) iyo qof murti qayaxan iyo fikrado wanaagsan kugu kordhiya laakiinse kuugu soo tabiya si mutuxan ama culus oo aan dufan kahayn.

Siciid Jaamac wuxuu ka mid yahay inta yar ee awoodda u leh iyagoo murti iyo aqoon kuu faai'deynaya inay haddana kuugu soo tabiyaan si macaan oo kaftan iyo maad lagu khafiifiyey, marka uu hadlayo iyo marka uu qalinka qaatoba. Marka aad akhrinayso qoraalladiisa sannadahan dambe iska soo daba burqanayey waxaa ku hor imanaya Siciid oo kuu sheekaynaya! Marka la iska sheekaysanayona asagoon ku talagalin ayaa mar walba waxaa sheekadiisa ka soo dhex burqanaya aqoontii uu cimrigiisa dheer ka soo dhitaynayey akhris-jeclida uu saaxiibka koowaad ka dhigtay buugga iyo dhiganayaasha la midka ah. Siciid wuxuu nasiib u yeeshay in uu afaf kala duwan aqoon dheer u yeesho wixii lagu qorayna dhuuxo, sida Carabiga (oo uu reer Cadmeed u ahaa), Ingiriiska oo uu wax ku bartay iyo AfSoomaaliga oo ah afkiisa hooyo.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Siciidow, saaxiib, ha nagu dhibsan inaan adigoo wali ifka taxtaxaashaya kaaga hadlayno hab Soomaalidu u barteen in looga hadlo oo keliya qof aakhiro ku maqan, halka ummadaha kale karaameeyaan oo abaal-mariyaan haldoorkooda inta uu noolyahay, si ay ugu noqoto dhiirrigalin, una ogaado inay dadkiisu qaddarinayaan dadaalkiisa. Ogoobe hab-dhaqankeenna loo bixiyey “xabaala-ammaan” waa kii uu ka dacwoodey Gaarriye, waana kan ay ka gilgisheen bahda Wardheernews, anna aan uga garaabay walibana ku bogaadiyey!

Saciid Jaamac Xuseen: Aqoon iyo Hal-adeyg

W/Q. Rashiid Sheekh Abdillaahi(Gadhweyne)

Soomaali aad u tiro badan baa Siciid Jaamac u taqaan aqoonyahan iyo qoraa ku caan ah curinta sheekada gaaban iyo maqaalada fiirada dheer leh. Kuwo gooni ka ahi waxa ay ku barteen waqti dheer oo ay waayaha nolosha la wadaageen; waa se laba ay kuwo ku saaxiibeen kuwo na ku kala guureen. Waa na sida isbaratada dadku badi ba ku dambayso. Anigu labada, waxa aan ka mid ahay kuwo hore. Sidaas darteed baan ugu dhiirranayaa in aan ereyo ka idhaa shakhsiyadda Saciid Jaamac Xuseen.

Sannadkii 1970kii, baannu markii u horraysay, ku kulannay xafiis magaciisu ahaa ‘Xafiiska Xiriirka Dadweynaha’(Mar dambe na waxaa loo baxshay Xafiiska Siyaayasadda ee Golaha Sare ee Kacaanka). Waxaa uu Xafiiskaasi, goortaas degganaa oo uu qayb kaga jiray Masraxa Ummadda ee Muqdisho (Mogadishu National Theatre). Waxa uu Saciid ka mid ahaa hawlwadeennada xafiiskaas oo uu kaalin togan ku lahaa. Nin kale oo aannu muddo dheer saaxiibbo ahayn bay asaga hortay isbarteen; ka dib na asagaa isu kaanno keenay. Ammin malaha, saacad ahayd ama ka yar, baannu halkaas ku wada sheekaysannay. Laga bilaabo goortaas ayada ahayd, illaa maanta xiriirkayagu waa joogto.

Saciid Jaamac Xuseen waxa aan ku bartay dhawr sifaale oo ay yar tahay dadka cid kulansatay. Waxaa ka mid ah ildheeri, indheer-arag, ogaal hayn, degganaansho iyo hal-adayg. Xilliga adag bay intu ba tijaabo galaan oo ay qofkii leh ka muuqdaan. Bilowgii Kacaankii Siyaad Barre, dadweynaha tirada badan waxaa laabkicin jiray halkudhegga dhalaalaya iyo heesaha qiirada leh. Dad se gaar ah oo qaarkood aqoon sheeganayeen, danaysi iyo cabsi baa dhinaca Siyaad Barre u riixay. Kuwo kale oo aan yarayn na qabyaalad baa kacaan iyo kacaandiid ka kala dhigtay. Saciid Jaamac waxa uu ka mid ahaa tiro yar oo aan labadaas mid na ahayn. Kooxdan taageeradoodu, bilowgii Taliska Siyaad Barre, waxa ay ka ahayd mabda’ iyo aragti. Ammin yar dabeed se, markii waagu dharaaroobay ee ay runi run timid, mabda’ iyo aragti bay kaga tageen oo taageeradoodii ku la noqdeen.

Siyaad Barre, dad waxa uu u necbaa qof caqligiisa iska sita oo ku la dooda. Haddii uu dareemo in qofkaasi xidhiidho badan leeyahay, carrab iyo camal na uu dadka saamayn karo, xabsi uu gesho iyo si kale oo uu magaca uga dilo, ba waa uu ku la dagaallami

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

jiray. Saciid Jaamac walaalkii Saalax Jaamac oo ahaa wiil yar oo dugsiga sare ee Banaadir (Banadir Secondary School) dhigta, ayuu xidhay oo hayn(detention) shan sannadood ah loo gooyey; asaga na waxa uu u diray tuulo yar oo Ceeldheer la dhaho. Waxa uu u magacaabay Guddoomiyaha Degmada. Waa maxay shaqada uu Siyaad Barre ka rabay Saciid ee uu halkaa ka qaban lahaa? Waa joogajoogaynta dadka; yaan laba qof gaar isu haleelin oo wada sheekaysanin, waa in dadka lagu shuqliya bannaabaxyo lagu taageerayo kacaanka, xaflado lagu ammaanayo asaga Siyaad Barre ah; waa heesahii "Guulwade Siyaad" iyo "Noolow Siyaad noolow" iwm. Saciid Jaamac wuu tegay meeshii loo diray; ma se yeelin tii Siyaad Barre ka rabay. Waxa uu ku ekaaday intii waajibaadkiisa ahayd sida amniga degmada iyo korjoogga adeegyada bulshada. Ma na uu yeelin, sidii dhiggiisu fali jireen, ee ahayd kadeedka dadweynaha iyo shaqaalaha dawladda. Markii uu Siyaad Barre sanqartii uu rabay Saciid iyo Ceeldheer ka waayey, ayuu ka soo celiyey uu na muddo lix bilood mise ka badan shaqo la'aan Muqdisho fadhiisiyey. Markii uu soo caban waayey, ayuu Siyaad Barre aakhirkii go'aansaday in uu Saciid arko. Way kulmeen. Sidii uu Siyaad Barre, kuwo badan oo kale uga bartay, waxa uu filayey in uu Saciid jaamac tiisa ku cowdo ama codsado. Ma noqonin sidaas. Asagii Siyaad Barre ahaa buu u jeediyey hadal u eg canaan. Wiilal aan labaatan sano u buuxin oo weli dugsgiga sare aan ka bixin, ayaa la xidhay oo xabsi dheer loo gooyey. Dawladdii Kacaanka ee awoodda weyn lahayd ma labadaa wiil baa wax yeelaya oo ay ka cabsanaysaa? Waxa uu Siyaad Barre ku la taliyey in uu sii daayo. Sidaas buu u la hadlay! Waa tu aanu filanaynin. Asagii Siyaad Barre ahaa baa ismiijiyey oo waxa uu ugu jawaabay 'waad yaraysanaysaa wiilasha ee dad bay abaabuli karaan oo kicin karaan'!. Ta Saciid waa mabda', ildheeri aan mar na ta meesha ku habbooni seegaynin iyo hal-adayg aan hamrasho aqoon. Intaasi waa waayo iyo warkood; Maanta na waxaa jirta tu kale oo tilmaanteeda leh ee aan u imaaddo.

Bishii feebarweri ee sannadka 2020, ayaan gurigiisa, magaalada London, ku booqday oo aan muuqiisa si fiican uga bogtay. Beryahan oo aannu laba magaalo ku kala noolnahay, waxa aannu labadayadu caado ka dhigannay kulan maalinle ah oo aannu telefoonka ku wada sheekaysanno. Muddo ba xanuunka kansarka ama saradaanka, ayuu la legdamayey, hadda ka hor se, ma uu jiifin. Waa lagu soo kordhay oo hadda sariirta ayuu saaran yahay; waxaa na ku rakiban qalab baahiyaha asaasiga ah ka caawinaya. Inta aannu Telefoonka isku waraysanaynay, mar keli ah codkiisa iyo warkiisa ka ma aan dareemin in uu xanuun ba hayo. "Halowda' telefoonka ka dib, waxaan hadal uga bilaabaa su'aasha xaaladdiisa. Qolka uu ku xabbisan yahay, sariirta uu dulsaaran yahay, qalabka ku tikraanan iyo xidhiidhka dhakhtarka, inta ba wuu ii dulmaraa. Markii ba se duni iyo xaal adduun baanu galnaa. Carradii Soomaalida iyo maxaa ka socda; waayaha adduunka maalin ba waxa ka taagan baannu ka wada faalloonaa; aqoon iyo dhaqan iyo suugaan ba, dhaxalka aadanaha ayuu ka sheekeeyaa; kaftan iyo maadayn na tiisii aan u la baxay "Kucmudology" buu igu jalbeebaa. Waan ku illoobaa xanuunkiisa ba. Si kasta oo u buko oo uu sariirta guriga ku dabran yahay, waa asagii. Waa Siciid Jaamac Xuseen.

Waxa aan ka faa'iidaystay kulankii Ururka Kayd oo loo ballamay 27kii, bisha Feb. 2020-ka (Waa kulan uu Siciid Jaamac ka soo qaybgeli kari waayey). Maalin ka hor baan u tegay oo aan u soo qasday in aan ishiisa ka bogto. Qolkiisa hurdada gudahiisa,

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

sariirta uu saaran yahay dhinaceeda ayaan kursi ku soo fadhiistay; halkaas baanu isku waraysannay oo intii aannu isla mari jirnay ba, isla marnay.

Hal-adaygiisu waa ka haleeliyey in uu – asaga oo xaaladdaas ku jira- hankiisa ku ballaadhiyey adduunka dhammaantii ee ka fikiraya waayaha dunida iyo dhibaatooyinka ka jira. Qolkan yar iyo xanuunku ku ma hayaan cuyuyub iyo cidhiidhi. Ayada lafteeda ayaanu ka sheekaysanay. Waxaa na aannu wada xusuusannay Nilson Mandela. Maalintii u horraysay xabsigii jasiiradda Robin Island la geeyey ee la geliyey qolkii go'doominta, ayuu nafta ku la dardaarmay in ay qolkaas ka dhigato oo u qaadato addunkii weynaa ee ay ku noolayd. Saciid hadda isma oga goor laga furfuri doono xadhkahan ku tigtigan(Alle idankii waa laga furiye), ka ma se go'doomin adduunka weyn ee wuu ku noolyahay. Si weyn iyo joogto ayuu u la falgelayaa oo uu tiisa ugu darsanayaa. Maqaalka uu dhawaanteer ku faafiyey Wardheernews, ayaa taas ka marag ah. Bal ka fikir qofka, asaga oo aan Siciid Jaamac, aqoon kale u lahayn, akhrisanaya maqaalkaas. Inna qofkaasi ku ma soo dhacayso xaaladda caafimaad ahaan, uu qoraagu ku suganyahay, kolka uu qarayo maqaalkan. Qoraagii Masar iyo adduunka Carabta ka caanka ahaa ee magaciisu ahaa Maxamuud Amiin alcaalim, aannu na waagiisii Saciid ka wada sheekaysan jirnay, baa lahaa weedha ***"qofka aadamiga ahi waa mowqif"***. Hadalkaasi Siciid Jaaamc Xuseen ayuu ku rumoobaa.

Ragannimadu waa, sidii Hadraawi yidhi, goor kasta ba iyo xaalad kasta oo aad ku jirto ba, "wax siraata noqo weeye". Alle asaga ayaa Tu Walba Kare ah ee caafimaad ha siiyo Saciid Jaamac.

Macallin iyo badh, saaxiib iyo badh, qof iyo badh

W/Q. Saynab Aadan Sharci

In badan oo macallin ama qof kaloo nool, kuna hor taagan ayey qoraallada Siciid Jaamac ka aayo badan yihiin.

Bal dib u yara milicsada ladhyada: 'Aan yara dalxiisno' ama 'Dhawdhawda iyo Codkarnimada' amaba kuwa kalee faraha badan ee uu qoraagu innoogu deeqay[1]. Bilaa lacag! Midba midka kale ka derejo weyn oo ka waxtar badan. Hadday siyaasad tahay iyo haddii ay arrimo bulsho tahay, hadday fan tahay iyo haddii ay wacyigelin tahay, baddaad xiisaynaysaba talo wax-ku-ool ah baa kaaga ifi.

Nin qoraal isku dayayow ha moogaan qoraalka Siciid ee la yidhaa 'Hage Kooban: Fanka tiraab-curinta Soomaaliyeed'.
Dhugidda, dhuuxidda, meel-dhigidda, ladh ku celinta macallinkayga waa mid aan barbardhig lahayn. Falcelinnaha aan ka helay haddaan tusaaleyn mid ama laba idinla wadaago[2]:

[1] Kaydka degelka Wardheer

[2] Labada tusaale een xusay, aad ayaan uga werweray ugana fekeray idinla wadaaggooda, anigoo is tusay in loo malayn karo in aan anigu isxayeysiinayo. In aydun indhihiinna ku aragtaan tabta iyo xeeladda macallinka ayaanse door biday.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

'…hadal ma qortid ee ra'yi ayaad qoraal ku dejisaa…'

Maba isu ogayn, mana u fiirsan, isaguse waa mar e, wuu ku dersay, marna ku fahmay, mar kalana wax ku baray. Macallin iyo badh dheh.

Tu kalaa iiga sii darnayd, 'realism' buu u celiyey, wuxuu i yidhi:

> 'I have really enjoyed reading your diary of August 2017. Upon a rainy day in search of your auntie's tomb in Hargeisa's graveyard and back.
> The writing is informal and intimate.
>
> This is what is called 'realism' in art and literature. It is free of any affectation or artifice. The interchange between English and Somali adds to the flavour for those who understand both languages'.

Gebagebadii wuxuu ku soo gunaanaday:

> Seynab, adeer, intaan kula jaanqaaday, ayaan ka bixi waayay kacaa-kuf.
> Qoraalka waan u bogay. Waqti xiise badan ayaan ku qaatay.
> I liked it immensely. More of that, please!
> Oday Siciid.

Ammaanta ka buuxso weel! Ardayad u haraaddan macallinkeedaan ahay. Laba erey oo aad loo soofay, laguguna soo ganay ayaa iyadoonad ogayn, shidaal horle ku siiya.

'Jid ma la martay, jidiin ma la cuntay, jebed ma la degtay'
Waqti aan imika fogeyn oo afar bilood ku dhowdhow ayaannu safar illaa iyo Jabuuti socdaalnay. Afkaa xada wax uurkaaga ku jira baa la yidhee adeer Siciid wuxuu xirfad bani'aadannimo u leeyahay in uu korkaaga ka daallacdo waxa uurkaaga ka guuxaya! Xaqiiq maragmadoonto ah weeye.

Fanka diblomaasiyeed ayaa gebi ahaantiis saaqday. Diblomaasiyaddu siyaasaddoo keliya maahee ta dad-la-dhaqanka ayaa si gaara ii cajabisay. Dhallaan iyo cirroole jamaciisu ma kala laha, jiil kasta la dhaqankiisa iyo heerkiisuu la falgali karaa. Kaftan aan laga dhergayn, dood wanaag iyo waayo-aragnimo baaxad leh, indheergaradnimo iyo hagar la'aan, intuba waa astaamo u gaar ah Adeer Siciid Jaamac Xuseen oo aad iyo aad kuu soo dhaweynaya.

Eebbe nicmooyin badan ayuu ku galladaystay, isna si wacan buu dadkiisa ugu adeegay. Alxamdulilaah, Allaa Soomaali inooga dhaliyey. Allaa mahad leh.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Siciid Jaamac Xuseen: The Essence of him

By Yasmeen Maxamuud

There are two kinds of people you often come across in this world, those totally and utterly impressed with themselves and those least impressed with thesemslves and are instead humbly encouraging and promoting those around them. Although he could boast about his accomplishments, my teacher and mentor Siciid Jamac is of the latter kind. He is giving, a good listener, and a statesman willingly giving you all his attention when in his presence making you feel as if you are the only one around, when in fact many like you are drawn to him for his kindness, attentiveness, wisdom, and hilarity. He is one of those people with soul and everyone loves a man with a soul. He has the power to draw you in and make you feel special.

I know Siciid Jamac to be an all in kind of adeero, always showing you your potential to do more, to do better to fill your purpose, and you find yourself trying to satisfy that purpose as he wished. I don't have many male friends of his caliber so I hold his strong and holly. Its as if his job is to lift you up and he knows exactly how to do it. He is a dude with dignity, and he can loan some of his listening skills to the rest of the Somali nation. Siciid Jamac will greet you with the most intimate and loving greeting "adeero gacalo" is how you are welcomed and embraced, you know this is not solely yours, but you tell yourself its.

Once you are sitting next to him you are there to hear his boundless experience as a writer, freedom fighter, government employee and all the stories he could muster in this rare presence, from his Aden days, or his time spent in the frontlines. If you are lucky you are paying attention, because he is one of a kind and you want to learn from this rare being. He could be talking about anything and you are hooked. You are never alone with him, there is always someone else shouting from the sidelines for him, but it's the few rare minutes that you find yourself capturing his kind courtesy that you find yourself making the most of it, and that gives you great lessons to gather.

I have met him in person only three or four times, and yet he has left me in awe, not too many people leave you wondering what kind of cloth they are made out of, we Somalis don't give each other time to get to know the essence of each other, we are often busy with the busy, Siciid is different, he is present while dignifying you in his abundance as a teacher that teaches you to care about the important things. Those of us that had the luck to be in his presence are better for it. Adeer Gacaliye noolow and continue to inspire us.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Aniga iyo Siciid Jaamac Xuseen

W/Q. Dr. Jaamac Muuse Jaamac, Hargeysa

“Siciidow waxaan doonayaa in aad ii sheegto 21 kulan oo aad gaar u xusuusato, kulammadaas oo naftaada saamayn ku yeeshay, ama qaab u yeelay -samaan iyo xumaan kuu doono ha noqdee- samaysankii qaran Soomaaliyi leedahay?” Su’aashaas ayaan ku billaabay wada sheekaysigan na dhex maray aniga iyo Siciid Jaamac Xuseen, annaga oo wada fadhina Bariga Landhan, Rugta Kutubta *“Idea store”* ee istaanka tareenka ee *Whitechapel*, dabaqa afraad. Waxa ay ahayd subaxii 31ka Oktoober 2016, waxana markaas uun naga tagay Sheekh Maxamuud Sheekh Axmed Dalmar. Siciid waxa uu iigu jawaabay: “I waydii su’aalo adigu, aniguna waan kuu warrami, halkaasayna 21ka kulan ka soo bixi doonaan e.”

Siciid Jaamac Xuseen waxa aan bartay aniga oo qof wayn ah oo samaysmay, fikir ahaan, qof ahaan iyo aydhiyoolaji ahaan waxa aan ka aaminsanahay habdhaqanka bulsho, awaale tiriskiisa, iyo fekerka guud ee nolosha, waxa na sabab u ahaa isbarashadayada Ayaan Maxamuud oo igu tidhi “Siciid Jaamac wuxuu ku hadlaa lix af.” Waxa ay ahayd muddo hadda 13 sannadood laga joogo. Siciid ma hubo in uu ku hadlo lix luuqadood, haseyeeshee waxa ay sheegistaa Ayaan ka turjumaysay hanka wayn ee ay u qabto saaxiibkeeda ay ehelka ka dhigato. “Adeerkay waa dawlad” ayay igu odhan jirtey, sannado ka dibna waxa aan ogaaday in haddii ba laga tago inta luuqadood ee uu ku hadlo, uu Siciid Jaamac yahay macallin saamayn wayn ku yeeshay cid alle cid ay is barteen 50 kii sannadood ee u danbeeyey.

Aan anigu ahaado qof samaysmay oo wax kala og, jidkiisa noloshuna u cad yahay markii aan bartay Siciid Jaamac, misna waxa ay macallinimadiisu kobcisey hab fekerkayga, waxa aan ka bartay dadnimo aad u qoto dheer, toosnaan, xaq soor, kini adayg togan, waxaana barashada aan bartey Siciid Jaamac ay ku yeelatay aniga iyo ahaanshahaygaba, saamayn aad u wayn. Sidaas darteed ayaan u doonayay in aan wax ka ogaado ciddii isaga saamaynta ku yeelatay noloshiisa.

Siciid Jaamac waa xikmaawi xusuus xejiye ah, waa ogaal badane u soo joogay dhacdooyin Soomaalida saamayn badan ku yeeshay, waana aqoon side xor ah, feejigan oo u fiirsada waxa hareerihiisa ka dhacaya. Waa siyaasi aanu daah ka saarnayn saamaynta go’aammada taliyeyaashii matarmiyeyaasha ahaa ee uu la soo shaqeeyey, ay ku yeesheen bulshada inteeda kale iyo aayaha ummaddooda. Siciid Jaamac waa qoraaga labada buug ee *Shufbeel* (2010) iyo *Safar aan jiho lahayn* (2012), sheekooyinkiisa gaagaabanina had iyo jeer waxay ku dhigan yihiin tiraab aad u sarraysa oo kuu saraysa halka ay ku jirto farriintu.

Waxa aan ula sheekaystay Siciid Jaamac Xuseen si aan ugu eego indhihiisa feejigan wixii Soomaali ku dhacay 50 kii sannadood ee u danbeeyey, mise waxa aan ka soo billaabay dhalashadiisii iyo samaysankiisii qofnimo, waxa isaga marka hore saamaynta wayn ku yeeshay, iyo adduun-araggiisa. Mar kale ayaan waydiiyey “carruurnimdaadii yaa saamaynta ugu badan kugu lahaa?” Inta u dhoollacaddeeyey oo yarehe baalladaymooday, sidii cidi na dhegaysanayso, ayuu hoos iila xanshashaqay. Kuye “Ma innaguun baa?” Waxa aan ku idhi “Haa”, anigoo su’aal u fahmay hadalkiisa.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Inta uu markan xoog u qosley oo codkii sare u qaaday ayuu shandaddiisii furey oo ka soo saaray waraaqo isku qasan. Kuye “Waxaan kuu sidaa hadiyad”. Waa qoraallo isku dhafan oo uu soo ururiyey oo u bixiyey “Ma anniguun baa!” Labadayadu waannu qosolnay, waxana uu igu yidhi kani buug ma aha wali iyo wax la akhriyi karo toona, adigu isku day oo u ekeysii buug, daabac oo dadka gaadhsii. Adiguna ka dhugo jawaabahii aad su’aalohooda i waydiinaysay qaarkood.

“Shufbeel” (2010), “Safar aan jiho lahayn” (2012) iyo “Ma innaguun baa!” (2018) waa saddex buug oo aan ku bartay Siciid Jaamac iyo sida uu aniga macallinka ii noqdey. Nasiib baan u yeeshay inaan saddexda buugba daabaco oo soo saaro, waxaanaan idinku martiqaadayaa in aad wada akhridaan saddexda buug si aad 21kaa jawaabood u heshaan idinka oo aan su’aalohooda cidna waydiin.

Laga soo bilaabo 2009kii, markii iigu horreysay, Siciid Jaamac wuxuu ii ahaa walina ii yahay garab ila qabanqaabiya oo ila sargooya barmaamijka sannadlaha ah Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa. Waa xubin guddiga sare ee barmaamijyada Bandhigga Buugaagta Hargeysa iyo Toddobaadka Dhaqanka Soomaalida ee Landhan.

Siciid Jaamac Xuseen waa geesi, geesina Alle ma xilo. Waxaan Ilaahay uga baryayaa caafimaad, cimridherer, iyo in aan Eebbe if iyo aakhiro toona ku xilin.

Siciid Jaamac Xuseen: Waayo’arag wax badan innala wadaagay

W/Q. Khaliil Cabdiraxmaan X. Xasan

Waxaan hoolka soo galay isagoo hadlaya. Codkiisa ayaa markiiba isoo jiitay. Codka weyn ee fasiixa ah iyo ereyda murtida iyo xikmadda miidhan ah ee ka soo burqanayay ayaan dhegaha u raariciyay. Waxay ahayd maalintii maqal iyo muuqba iigu horreysay aqoonyahan, qoraa sare Saciid Jaamac Xuseen.

Waxay ku beegnayd qiyaastii badhamihii sannadihii labada kun. Goor galab ah ayaan soo galay Aqalka Oxford (Oxford House) ee Bariga London oo barnaamij afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed lagaga hadlayay lagu qabtay. Dhawr sanno ka dib xilligaas ayaa Siciid la isku kaaya baray isla madashaas Oxford House oo bandhigga toddobaadka Soomaalidu ka socday. Barasho aan mahadiyay ayay ahayd.

Wixii xilligaas ka dambeeyay waxa uu kow ka noqday haldoorka aan ku soo hirto. Sida judhiiba codkiisa iyo aftahanimadiisu ii deeqeen si ka weyn ayay dabeecaddiisa iyo dadnimadiisu ii deeqeen markaan isbaranay. Qalbi furnaanta, kalgacalka iyo soo dhawaynta ay xurmadu ku dheehantahay ee uu kugu qaabilayaa waxay kugu reebaysaa xasuus aan duugoobin. Dareen ku faraxgelinaya mar kasta oo aad kulantaan.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Goob kasta oo Soomaali isugu timaaddo oo aan ku kullano agtiisa ayuun baa la Iga dayaa. Sheekadiisa iyo kaftankiisa ayaanad marnaba ka xiiso dhacayn. Inkastoo aanu isaragayagu badnayn haddana ismaqalkayagu waa joogto. Khadka telefoonka ayaanu marwalba ku wada xidhiidhnaa.

Siciid Jaamac Xuseen waa waayo'arag wax badan u soo joogay. Waayo'arag jecel in waayihiisii iyo wixii uu u soo maray bulshada la wadaago. Waa qoraa aanad marna qoraalladiisa ku hungoobayn. Qoraa afkiisa hooyo u hiiliyay isagoo awoodi kara in uu afaf kale si fiican oo farshaxanimo leh wax ugu qoro. Siciid jaamac Af Soomaaliga, Carabiga iyo Ingirrigu waa isugu mid haddana waxa uu doorbiday in uu dadkiisa wax u qoro, afkoodana ugu qoro.

Qoraa Siciid Jaamac Xuseen ka sokow in uu qoraal kula wadaago bulshda waayihii la soo maray, waxa ujeeddada qoraaladiisu yihiin in uu ku dhiirigeliyo xogogaalka kale ee Soomaaliyeed in ay waayo'aragnimadooda u soo gudbiyaan shacabka. Siciid Jaamac isagoo arrintaas faahfaahinaya ayaa mid ka mida qoraallada uu ku soo bandhigay degelkan WardheerNews uu ibo-fur uga dhigay ereyandan, " Hore ayaa degelkan 'WardheerNews' la iiga bartay qoraallo ku magacaaban "Safar Aan Jaho Lahayn", anigoo uga gol lahaa in qeyrkay oo igaga habboon in ay iyana nala wadaagaan ama ummadda u soo gudbiyaan wixii xasuusqor ah ee ay hayaan. Weli ma hayo cid arrintaas u soo banbaxday, hase yeeshee waxaan la kulmay aqristayaal fara badan oo qoraalladaas u bogey. Maanta waxaa iskay tusay inaan khaanad kale abbaaro; waa intaas oo dhinacan aynu helnaa dad u jajabsan oo ku soo dhiirrada inay wax ka qoraan. Baabkani waa kulammo la yaab leh oo Madaxweyne Maxamed Siyaad Barre iyo mas'uuliyiin Soomaaliyeed dhex maray. Kulammadaas oo arrimo wejiyo badan leh iftiiminaya, gaarahaan siyaasaddii dalka lagu hoggaaminayay waqtigaas."

Waxaan nasiib u helay in aan ka mid noqdo dad tiro yar oo uu qoraalladiisa la wadaago ka hor inta aanu daabicin. Marka uu qoraalka emailka iigu soo diro ayuu islamrkiiba isoo wacaa. Salaan iyo iswareysi ka dib ayuu i yidhaa, "wax yar baan soo xarxariiqee bal innaga fiiri in bulshada lala wadaagi karo". Hoosta ayaan ka qoslaa waayo waxaan ogahay waxa uu soo diray in ay ka weyn yihiin wax la xarxariiqay.

Siciid Jaamac ma aha keliya qoraa balse waa macallin habka tiraab-curinta toolmoon ku barbaariya da' yarta leh hibada, hanka iyo hal-abuurka qoraanimo. Mar uu talo siiyo iyo mar uu siminaaro u qabtaba.

Siciid Jaamac waa aqoonyahan shakhsiyaddiisa dhinacyo badan laga fiirin karo haseyeeshee inta kale waxaan u dhaafayaa asxaabta xogogaalka u ah oo aan rajaynayo in ay bulshada si fiican ugu iftiimin doonaan.

Ugu dambeyntii sida aan la wadasocono Siciid jaamac wuu xanuunsanyahay. Sidaadarteed waxaan Ilaaha qaadidka ah ugu baryayaa in uu caafimaad taam ah siiyo, waxaan akhristayaashana ka codsanyaa in ay u soo duceeyaan.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Siciid Jaamac Xuseen; Qoraa Xil-kas ah!

Dr.Cabdifitaax Nuur Axmed (Ashkir)

Muddaba, waxaan ku taami jiray in la maamuuso hal-doorka Soomaaliyeed inta ay noolyihiin; maamuuskaas oo dhiiri-galin u noqon kara in ay labajibbaaraan curinta hal-abuurro kaloo dhaxal iyo kayd u noqda ummadda Soomaaliyeed.

Dareenkaygaas ma dhaafsiisnayn fikri had iyo goor dhex-mushaaxa maankayga oo kaliya, way jiraanse, aqoonyahanno galbadoo aan baroor-diiq ka qoray; iskumase dayin, in kuwa nooloo dhulka maraya aan qoraal ka sameeyo. Waase arrin uguboo bogaadin iyo taageero mudan.

Maalmo ka hor ayaa saaxiibkay Cabdikariim C/rixmaan Xaaji Xasan oo ka tirsan bahda "Wardheernews" ila soo xiriiray, igana codsaday in qoraal lagu maamuusayo Siciid Jaamac Xuseen - oo ah qoraa weynoo hal-doorka Soomaaliyeed safka hore uga jira - diyaariyo, qoraalkaas oo aan uga faaloonayo waxaan ka aqaan Siciid Jaamac iyo dareenkayga ku aaddan - shakhsi ahaan- dalag-aqooneedkiisa dhinaca dhigaalladiisa, kamana marnaan doono qoraalku - sidaan u fahmay-muujinta dareenkayga ku aaddan: aqoonyahankaas eebbe hibada u siiyay farshaxannimada qoraalka.

Aqoontaan Siciid Jaamac Xuseen u leeyahay sidaas uma sii durugsana, waxaannu isbarannay dhamaatkii sannaddii 2017-kii, oo ah goortaan bilaabay in degelka "Wardheernews**"** aan ku qoro dhambaaladayda Afka Soomaaliga ah, waxaanna libinta barashadeyda ee Siciid Jaamac u hayaa Cabdikariim C/raxmaan X.Xasan oo i baray ruux bulshada miisaan xoog badan ku leh, kaalin muuqatana ka qaatay u hiilinta Afka Soomaaliga markay dowladdayadii dhexe duntay bilowgii 1991-kii.

Barashada raggu waa raasu-maal ma guuraan ah, teer iyo intaan bartay Siciid Jaamac waan ku faro-adeeygay oo ma sii dayn, xiriirkayagu -inta badan- wuxuu ahaa mid aan farriimo Is-dhaafsanno, annagoo ku kala war qaadanna sida hadba xaalku yahay? Mar kastuu Siciid farriin ii soo diro, waxaan qiraa in Siciid yahay: ruux weli ku dhaggan siduu xaal ahaan jiray! Ma doorinnin qaab-qoraalka cusub ee dhallinta maanta wax ku tabiyaan, wuxuu weli ku dhagganyahay sidaan waraaqo diridda - markaan ardayda ahayn nalagu baray- oo ahayd: (Arar, Nuxur iyo Gunnanad) waraaqoo idilna waa in ay intaas ka koobantahay.

Dareenka waraaqaha uu Siciid Jaamac ii soo diri jiray, waxay ahayd mid dhab-hadal ah, qurbuhu ma aanu baddalin dabeecaddiisii Soomaalinimo, aqoontuu afafka kala duwan u leeyahayna ee kala ah: Af-Soomaaliga iyo Af-Carabiga iyo tan qalaadee Igiriisida, waxay dhaxal-siiyeen dad la dhaqan wanaagsan, horuu **"**Abuu Cabdalla Maxamed Bin-Iddiriis Al-Shaafici" u yiri (Waman Nadar Fii Al-Luuqati Raqa Dabcuhu" oo micnaheedu noqonayo (Qofkii luuqadaha bartaa dabeecaddiisaa wanaagsanaata) Siciid run ahaantii wuxuu ku suntanyahay hadalkuu Imaamu Shaafici yiri.

Qofkii doonayase, in uu Siciid Jaamac si mug leh u bartaa ha akhriyo buuggiisii **"**Safar aan Jiho Lahayn**"** mar **Siciid** safar ku yimid Hargeysa ayuu ii soo dhiibay

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

buuggiisaas aan ka codsaday isagoo Caasimadda Ceeryaamadu hareysay jooga **(**London) waa siday Carabi u taqaanee!

Dabadeedna, waxaan akhriyay buuggiisii kale ee "Shufbeel" waa laba buug oo aad ka dheegan karto shakhsiyadda dhabta ah ee Siciid iyo siduu u fakaro, labadaa buug iyo xiriirkayagii dhinaca waraaqo issu-diridda markii laga yimaado, waxaan fursad qaali ah ku kulannay Siciid Jaamac bishii (January 2020) gegida diyaaradaha ee (Addis Ababa) waxaana muddo saacad ah rafiiq ku noqonnay dayuurad noola duushay dalka aan walaalaha nahay ee Jabuuti; si aan uga qayb-galno shirkii 6-aad ee bahda qalinleyda iyo hal-abuurka Soomaaliyeed ee "SSPEN".

Muddadii aan hawada ku jirnay, baan Siciid Jaamac si kaloo ka qoto-dheer intaan horay ka aqiin u sii bartay, aniga iyo Siciid-ba waxaa na mideeya jeceylka aan u hayno luuqadda bah-wadaagta la ah teenna Soomaaliga ee Af-Carabiga, Siciid wali korka ayuu ka hayaa suugaanta Carabiga, waliba ugu luuqeeynaya si cajiib badan oo dhadhansi leh.

Siciid Jaamac iyo kuwa kaloo la midka ah ee magoolkii ummadda Soomaaliyeed, waxay mudanyihiin in inta ay noolyihiin la maamuuso, wax micno ah u sameyn mayso markay xabaaal galaan in loo baroorto, inta ay noolyihiin waa in la abaal-mariyaa.

Markaan sidaas leeyahay waxaa durbadiiba maankayga ku soo duulay tixdii uu tiriyay Faylasuufkii maansayahanka Soomaaliyeed Maxamed Xaashi Dhamac "Gaariye" (1951-2012) isagoo Soomaalida u bixiyay "Aasi og". Wuxuuna tiriyay tix uu hogo-tusaaleyn uga dhigayo sida umaddu marka qof raad ka tagay dhinto u baroortaan, wuxuuna yidhi sidatan:-

Halaguu Ilmeeyee, horta dhimo af ma ahee!
Eeggoo la noolyahiyo, ifkaan kaaga baahnay.
Wax yaroo aqoonsiya oon aad u buurnayn.
Oo waliba eegay! igu sii amaahoo.
Ictiraafka buuxiyo, aakhiro markaan go', iilka igu sugayiyo.
ayaantaan xabaal galo, oohintaan mutaystiyo akoonkayga laga jaro!

Siciid Jaamac Xuseen: Astaanta Kaalinta Qoruhu ka Qaadan karo Horumarinta Afka Hooyo

W/Q. Liibaan Axmad

Qoruhu wuxuu ka mid yahay xubnaha bulshada ugu firfircoon dhanka gudbinta aqoonta, ra'yiga ama aloosidda dooddaha. Inkastuu af Soomaaligu qoran yahay 48 sano, Soomaalidu waxay ka mid tahay dadka waxa badan ka dheefay ereyga qoran. Cilmibaarihii Af Soomaaliga, B W Andrezejwski, wuxuu ku doodday in af Soomaaligu ku gaaray in ka yar 10 sano inta ay afaf kale ku gaareen 300 oo sano.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Horumarkaasi si cad nooguma muuqan karo haddaynan dul istaagin kaalinta qoraaga Soomaaliyeed ku leeyahay horumarka dhaqan oo ay Soomaalidu samaysay dhowr iyo afartankii sano oo u dambeeyay. Qoraha aan sida gaarka curiskan ugu xusayo waa Siciid Jaamac Xuseen.

Siciid wuxuu qoray curisyo iyo sheekooyin qaarkood lagu soo ururiyay buuggiisa *Shufbeel*. Siciid waxbarashadiisii waxay ku salaysnayd afafka Ingiriisiga iyo Carabiga intuu joogay magaalada Cadan oo uu ku dhashay kuna barbaaray, hase ahaatee wuxuu doortay inuu afkiisa hooyo wax ku qoro. Curiskani ma soo koobi karo baaxadda qoraallada Siciid dhanka adeegsiga af Soomaaliga iyo qodobbada qoraalladiisa kala duwani ku saabsan yihiin.

Sheekada gaaban *Shufbeel,* oo 1993kii ku soo baxday xilliilaha *Hal-abuur*, waxay kulansatay koobnaan — marka la eego tirada ereyada — iyo ballaarnaan — marka la eego arrimmaha qoruhu ku qaadaadhigayo hab male-awaal ku salaysan. Su'aal igu soo noqnoqota marka aan *Shufbeel* u sii fiirsado waa: ma dhaqanka hal qof mise dhaqanka bulshada baa u horseeda Soomaalida burbur? May aha su'aal jawaab fudud loo heli karo waayo xalka loo raadinayo dhibaatada dabadheeraatay ee Soomaalida wuxuu qayb ahaan ku xiran yahay jawaabta su'aasha sheekada *Shufbeel* ka soo baxaysa. Sheeko ka mid ah sheekooyinka *Shufbeel* ku jira waxay muujinaysaa sida qoruhu uu soo bandhigi karo hodantinimada af Soomaaliga isagoo rogrogaya hal *fal* (verb). Farshaxannimada qoraalku waxay taageeraysaa in farriinta sheekadu caddaato saamayn la'aanta ku celcelinta falka awgeed.

Curiska A*woodda Ereyga Qoran*, oo ka mid ah curisyada *Shufbeel* ku jira, waa qoraal mudan qorayaasha iyo warfidiyeenka Soomaaliyeed inay dhuuxaan marar badan iyo in lagu barto dugsiyada laga dhigo wax ku qorista af Soomaaliga.

Qoraha kaalintiisu may noqon karto kobcinta afka hooyo oo keliya. Wuxuu qaadan karaa kaalin lagu kobcinayo garashada dadkiisa si ay nabad ugu wada noolaadaan oo xaqa qof kasta loo dhowro. Nolosha Soomaalidu way ka soo gudubtay xilligii ay ku salaysnayd cadka iyo caanaha iyo talada oday dhaqameedka oo keliya. Murugsanaanta nolosha cusubi waxay u baahan tahay wax ka qoris, ka doodis, la dagaallanka rumaysashada doodaha siyaasadeed oo aan caddaynta ku salaysnayn ama kuwa gaboodfalka ku salaysan. Waa sababta odhaahda *Qalinku wuu ka awood-badan yahay seefta* u noqotay mid u dhiganta *Wixii qoran baa quruumo hara, muxuu hadal qiimo leeyahay?*

Ummadda Soomaaliyeed maanta waxay maraysaa marxalad ay soo baxeen madax tirobadan oo wadaagta baahi joogto ah oo ku qotonta isla-xisaabtan la'aan siyaasadeed. Way ka duwan yihiin keli-talis wayse ka awood-badan yihiin. Kaalinta qoraha Soomaaliyeed ka qaadan karo yaraynta u nugleynta dadka tabaha geddisleyda siyaasadeed ee Soomaalida kama dhacdo kaalinta kobcinta afka hooyo oo uu qalinka qoraaga Soomaaliyeed qaadan karo. Curisyada iyo sheekooyinka Siciid Jaamac Xuseen ayaa nagu baraarujinaya kaalintaas.

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

Waa Kuma Saciid Jaamac Xuseen?

W.Q. Boodhari Maxamed Warsame

Marka lagu yiraahdo macallinkaaga iyo hanuuniyahaaga nololeed wax ka sheeg, in aad wax san ka sheegto ma waydid, haddana marar badan ayaad waydaa sidii ay uga sheegi lahayd oo erayadeedu kugu adkaadaan. Taa macnaheedu ma aha in aad ku guuldarraysto wax ka sheegidda qofkaa aad qaddarinta wayn u hayso ee waa in aad heshaa earayada ugu habboon, ugu kooban ee runta iyo dhabta aadaninnimo ugu dhaw.

Haddii la i yiraahdo, waxaad ka sheegto ma waydide bal dhawr uun ka sheeg, waxaan dooran lahaa midda ah in casharrada aan Saciid Jaamac Xuseen ka bartay ee i anfacay ay ka mid tahay murtida ku qotonta tiraabcurinta toolmoon ee sheegaysa qoraal kiisa kooban ee murti ahaan nuxurka ama ujeedka ugu heli og dadka wax loogu qoro. Aniguna tabtaa in aan Saciid wax uga sheego ayaan halkan isku deyayaa.

Saciid Jaamac Xuseen waa aadane suubban oo wanaag la jooga, cimrigiisu u barakoobay, oo waayo nololeed iyo waxqabad loo aayey leh. Waa reer magaal noociisa ugu dunta wanaagsan (cosmmopolitan), isaga oo isku darsaday xadaarinnimo iyo aqoon kaasha oo aanu dadkiisa ka hagran la wadaagistooda. Carri Soomaaliyeed buu ku dhashay, qurbe ayuu ku koray, haddana carri Soomaaliyeed ayuu ku soo laabtay oo in badan ka shaqeeyay; haddana mar kale ayuu qurbe u haayaamay oo uu ilaa hadda ku noolyahay. Inta uu dunida dal maray, dad arkay, afaf bartay, dhacdooyin u soo joogay ee uu haddana intaaba qalin iyo warqad ku dhiteeyay halkan lagu ma soo koobi karo. Waa dadka kooda afka qalaad loogu yaqaan ”cititzen of the world” ama ”global citizen.” Waa waaya’arag il dheer oo qofka barta ama muddo, inta ay doonto ha le’ekaatee, ag joogaa aanu sinaba ugu hungoobayn. Waa dadka la yiraahdo ”hebel waa wanaajiye” (makes you a better person).

Waa anigii ka afeeftay, waana aan ka baqayaa in aanan erayadii ku habboonaa wali haleelin e aan yara waabiyo oo qodob kale idin ka tuso. Maalin aannu Saciid Jaamac Xuseen is waraysannay, waxa aan ka hayaa oo aanan waligay illaabayn, jawaab uu ka bixiyay wayddiin uu ila toostoosiyay oo ahayd, “Waa maxay taariikhnololeed?” Wuxuu ka yiri, haddii aan si yar u soo koobo:

“Qofka aadanaha ah intii la doono ayaa la ammaani karaa ama la dhaliili karaa marka taariikhnololeedkiisa laga sheekaynayo, nolol iyo geeri dabadeedba. Macne waynna samayn mayso in dhacdooyinka la xiriira halganka nololmaalmeedkiisa la buunbuuniyo ama lagu soo celceliyo, si kasta oo loogu bogo dhacdooyinkaa. Waxa macnaha wayn samaynayaa waa in la is wayddiiyo waxa taariikhnololleedka dhabta ahi uu yahay, kaa oo ah in xoogga la saaro qofkani muxuu dinida, degaanka, iyo buslhada uu la noolyahay ku soo kordhiyay ee looga ayaa? Marka uu noolyahay waa in la is wayddiiyaa muxuu nololaha kale ee ku xeeran si togan uga beddelaa, geeri

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

dabadeedna muxuu ka tegay oo isla nololahaa iyo kuwa ka dambeeyaba waxtar ay sii dheefsadaan oo lagu xusuusto u ah? “

Ugu dambayn, dadka doonaya in ay wax ka bartaan qofnimada, waayaha, iyo waxqabadka wali aan is dhimin ee Saciid Jaamc Xuseen, waxaan ku la talinayaa in ay si dhugmo qoto dheer leh u akhriyaan saddex bug oo uu qoray, kuwaa oo ka mid ah qoraallo badan oo uu si deeqsinnimo leh dadkiisa iyo dunida oo dhan u la wadaagay. Waa saddexda buug ee kala ah:

1. Safar Aan Jaho Lahayn (2013)
2. Shufbeel (2011)
3. Ma Innaguun Baa! (2018)

Wada akhri buugaggaa oo haddii aad doonto sidaa aan isugu xijiyay ee ay aniga iigu badiyeen u akhri, dabadeedna intaa kore ee aan anigu ka sheegay in aad iska qubto waa ay istaahilaan. Kolley, sida aan qabo, mar haddaad saddexdaa akhriso, cid kale oo uga war roon heli maysid.

Mahadsanid Adeer Siciid Jaamac Xuseen

W/Q. Saddaam Xuseen Carab (Wiilkaagii)

Marar badan uma baahna in loo sheego sida uu qofkaasi yeelayo iyo sida aanu yeelayn, si loo qaabeeyo adduun araggiisa ama loogu biiriyo waayoaragnimo. Sida ay u badantahay, yeedhinta arrimuhu kuma sama’e, siyaalo kale ayaa kaga qumman. Hab tebintaadii waayoaragnimo ee nolosha barakada leh ee aad soo martay, baa, adeer ka mid ah siyaalaha qof dhallinyar loogu sheego halka laga yimid iyo halka ay tahay in la aado.

Lix sanno ka hor, 2014, oo ahayd markii qof ahaan si toos ah aan kuula kulmay, kuula sheekaystay ee aan si dhab ah isu barannay, ilaa hadda oo uu xidhiidhkeennu, joogtoba yuu ahaane, uu sii xooggeysto, aqoon aanan dugsi ama jaamacad ku baran baad I bartay. Mahadsanid adeer, casharro nolosha, noolaha iyo hab nololeedka, gaar ahaan midka hoggaamineed, siyaasadeed iyo sooyaal ee bulshadeenna ayaad si hagar la’aan ah iigu hibeysay.

Mahadsanid adeer, sooyaalkii siyaasadeed ee soomaalida, intii ka dambaysay gumeystaha oo badi, door qaayo leh aad ku lahayd, baad si furan iigaga warrantaa mar wal oo aan kulanno. Waydiimaha ku aaddan sooyaalka qaybihiisa aan waaddaxa ahayn, ee marar badan odayaal badani ka muquurtaan ka warramiddiisa, in aad si furan oo kalsooni leh iigaga warcelisaa, kalsoonida ah in aan sooyaalka laga been abuuran ee runta qadhaadh la sheego ayey igu boorrisaa. Adeer mahadsanid, in aan sooyaalkaaga ka bartay qaayo waynida ay leedahay in aad noqoto qof leh aragti oo aan dabaysha waayuhu hadba meel geyn.

In aan doorka qof Aadame raba in uu waxtaraa, keliya ahayn in uu noqdo qof la yaqaan baan ka bartay noloshaada. Waa biyo kama dhibcaan in dad badani aanay xog-ogaal u ahayn saameynta aad ku lahayd badi dhacdooyin waaweyn oo sooyaalka bulshada soo maray, aanad marna rabin in ay noqoto shaacsane. In noloshu ku raaxo

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

badantahay in aad run ahaato, ee aanad been la dhoobay noqon ayaan kaa bartay oo ku bartay intaas aan xog ogaalka kuu ahay. Dadkii tayo-da lahaa in ay ku sii yaraanayaan dawladnimada Soomaalida meel wal oo ay tahayba, oo ma garato badani hoggaan noqotay ayaan ka dhex akhriyaa noloshaada. Mahadsanid Adeer.

Sida caadiga ah in aan loo fekerin, loo jawaabin, loo abla ablayn nolosha ee dhinacyo aan caadi ahayn, oo ka korran hab feker hooseeya lagu eego, ayaan kugu aqaan oo kugu tusaalaystaa. Mar kasta oo aan magacaaga iyo muuqaaga xasuusto waxa aan kugu xasuusanahay in aad tahay qof door laxaad leh ka qaatay samaynta iyo saamaynta haldoorro bulsho oo maanta qaar badani kaa magac dheeryihiin. Waxa aan kugu astaystaa sida aad u aaminsantahay in dalowga bulsho ee aan ku sugannahay in dhallinyar, bes, dhallinyar aqoon ku xor ahi badbaadin karaan oo nolol abuuri karaan. Daacadnimo, farxad, kaftan, waayoarag iyo gobonnimo oo idil ayaad astaan u tahay. Qoraalkanna, waxa aan jeclaystay in aad akhrido oo ugu yaraan waxtarka bilaa shuruudda ah ee aad nolosheyda aad ku leedahay awgii, kugu idhaa, adeer mahadsanid.

Siciid Jaamac Xuseen: Cabqari Xariir ah

W/Q. Cabdikarim Cabdiraxmaan Xaaji Xasan

Mar kasta oo aan rajada Soomaali is idhaa waa quus, waxa aan xasuustaa Siciid Jaamac Xuseen, oo astaan u ah tayada (human capital), wanaagga, hufnaanta iyo in aan laga rajo beelin Soomaali iyo dalka Soomaaliyeed-ba.

Siciid waa diiwaan taariikheed oo taagan, waa Maktabad socota (a moving library), maskaxdiisa ay ka buuxdo, sooyaalkii Soomaaliyeed ee xiliyadii dalku soo maray, khaasatan intii xukunkii Kacaankii Mileteriga, kacdoonnadiii lagaga soo horjeeday iyo intii ka dambeysay ee burburkii dalka iyo nolosha Qurbaha.

Siciid waxa uu ka mid ahaa haldoorkii wakhtigii Soomaaliya ay hormuudka u aheyd taag iyo tusaalle-ba Afrika iyo guud ahaan Caalamka soo koraya, dalka taabbaqaadkiisii, xoog, aqoon iyo waayo-aragnimoba ku biiriyay. Ka gadaalna waxa uu kow ka ahaa, markii tubtii danta guud laga weecday, oo qabiil iyo qof jecleysi (nepotism and cronism), loo leexday, aan la eheloobin, ee ka dhiidhiyay. Haddana wali aan ka daalin hogatusaaleynta iyo kobcinta ummad aqoon iyo waay-aragnimo aan looga badin.

Siciid waxaa isku kaaya xidhay Axmed Cabdrixamaan X. Xasan abaara 2009, oo ay ka wadaqeyb galeen dood Suugaaneed ka dhacday London, isaga oo ila wadaagay in ay is barteen Siciid Jaamac, oo uu ku sifeeyay shakhsi qiimo badan leh. Halkaas baanu ka wada ambaqaanay aniga iyo Ustaad Siciid.

Aniga oo aad ugu xiisa qaba in aan is aragno Ustaad Siciid Jaamac, ayaanu 2010, Lodon ku kulanay Bandhig Sanadeedka " Usbuuca Soomaalida". Maadaama ay London tahay magaalo balaadhan, Soomaaliduna aad u degan tahay, wakhti fiican oo aanu si wacan iskugu xog warano maanu isku helin, laakiin dhowr kulan oo aan iga

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved

haqab tirin la sheekaysiga, dhegeysiga, doodda, tariikhda iyo sooyaalka Soomaalida ayaanu yeelanay. Markii aan London ka soo noqday, kulankiisii waxa uu igu dhaliyay niyad sami iyo werwer labadaba. Aniga oo markaasi aaad ugu bogey xariirsanaanta (refines), dhowrsanaanta iyo ixtiraamka aan laheyn –aniga-aniga iyo isiqaadqaadka (humbleness), hadda Soomaali badankeed u noqday dhaqan. Dhinaca kale Siciid oo igu abuuray welwer ah in dadka ku astaysan sifahaasi ay ku yaryihiin Sooomali maanta.

Waxyaalaha dhaxalka u ah Soomaali ee Siciid aad isgu hawlay, waa buuggaagta iyo qoraallada uu ka qoray waayaha uu u soo joogay, oo uu ku soo ururiyay buuggaag tiro badan oo ay ka mid yihiin Safar aan Jiho laheyn, Shufbeel iyo buuggiisa ugu dambeeyay ee " Bulshoy ma is baran laheyn", oo ay wada qoreen W.N Hembert, 2018, iyaga oo ku soo ururiyay maansooyin tisqaaday. Waxa kale oo jiray maqaalkiisii ugu horreeyay ee aan akhriyo, kaasi oo Ingriisi ku qornaa, isaga oo ka sheekeeyey qiso ku qabsatay dalka Jabuuti magaalada Tadjuura!. Maqaalkaasi oo ahaa- Reminiscences of my Tadjooura days **.**

Siciid qoraalladiisa waxa ku taxan dad aad u tiro badan oo xiiseeya akhrinta iyo qorista Afka Hooyo.

Siciid waxa uu waktigiisa aad isugu xilqaamay ama isku taxalujiyay in uu la wadaago fikirkiisa iyo waayo-aragnimadiisa Soomaali. Waa hawlkar aan daalin, oo maskaxdiisu maaxanayso. Usbuuc ka hor oo aan la hadley, waxa uu iila ekaa codkiisu iyo firfircoonaantiisa (energy) ku jirta, wax aan caadi aheyn!

Waxaan rajaynaa in aan wax badan kaga dayano Siciid Jaamac-na, waxaan u rajyanayaa caafimaad iyo barwaaqo.

WardheerNews.

Maqaal kale oo la halmaalla macduucan:

-Dr. Georgi Kapchits: Aqoonyahan Abaalmarin inga muddan

-Youtube- Gobi waa tii la garto

Copyright © 2020 WardheerNews, All rights reserved